

Mutadawacnimada Xarunta Waxbarashada Hore



Department of Children, Youth & Families (Waaxda Caruurta, Dhalinyarada & Qoysaska, DCYF) xarumaha waxbarashada hore waa khayraad wanaagsan. Haddii barnaamijyada waxbarashada hore hirgaliyaan oo caawiyaan mutadawiciinta xarumahooda, waxa jira shuruudo gaara oo ay tahay in la buuxiyo. Dukumentigani wuxuu ahmiyad siinayaa shuruudahan.

Khuseeya Mutadawiciinta

- Dhamaan mutadawiciinta waxa loo tixgaliyaa adeeg-bixiyayaasha waxbarashada hore aan lagaga tagayn kaligood caruurta oo ay tahay inay kormeer ku sameeyaan shaqaalaha barnaamijku markasta. WAC 110-300-0005. Si aad waxbadan uga ogaatid sharcigan, booqo <https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-300-0005>.
- Dhamaan mutadawiciinta liisan u haysta barnaamijyada waxbarashada hore waa inay ahaadaan 14 sano jir da'da ama ka weyn. WAC 110-300-0100(10).
 - Haddii uu ka yarahay da'da 18, mutadawiciintu waa inay haystaan ogoalaanshaha waalidkood ama masuulkooda. WAC 110-300-0100(10).Si aad waxbadan uga ogaatid sharcigan, booqo <http://apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-300-0100>.
- Mutadawiciinta qaar waa inay lahaadaan talaalka MMR (measles, mumps, and rubella) (jadeecada, finanka iyo jadeeco-jarmalka) ama cadeyn badqab. Si aad waxbadan uga ogaatid shuruudan, akhri warbixinta Xeerka Guriga 1638 ee <https://www.dcyf.wa.gov/news/house-bill-1638-removes-mmr-vaccine-exemption-schools-child-care-centers>.
 - *Xarumaha:* Dhamaan noocyada mutadawiciinta ee liisanka xarumaha daryeelka cunuga waxa looga baahan yahay inay bixiyaan diwaanka talaalka ee tilmaamya inay heleen talaalka MMR ama cadeyn badqab.
 - *Guryaha Qoyska:* Talaalka MMR ama cadeyn badqab ma qabanays mutadawiciinta liisanka guryaha daryeelka cunuga qoyska.

Mutadawiciinta Hada iyo Mutadawiciinta Marmarka

Barnaamijyada laysinka ayaa go'aamiya nooca mutadawiciinta ay u ogolaanayaan barnaamijkooda iyo mutadawac oo buuxinaya shuruudahan hoos lagu taxay.

Mutadawiciinta Hada

- Mutadawiciinta hada waa inay ku jiraan kormeer joogto ah oo macalin hogaamiye ah, kormeere barnaamij, agaasime xarun, kalkaaliye agaasime, kalkaaliye macalin, ama laysinka haysta guriga qoyska.
- Mutadawiciinta hada **ayaa** ku jiraya tirada marka dhamaan shuruudaha hoose la buuxiyo:
 - Waa inay dhameystiraan hubin xog shakhsiga ku sahabsan marka loo eego WAC 110-300-0100(10)(c)(i). Si aad waxbadan uga ogaatid sharcigan, booqo <https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-300-0100>.
 - Dhameystiri shuruudaha caafimaad iyo badqab ee lagu sheegay WAC 110-300-0106(4-10)ka hor la bilaabin saamiga. Si aad waxbadan uga ogaatid sharcigan, booqo <http://apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-300-0106>.
 - Waa in la dhameystiro baadhista tiinbayda (TB) marka loo eego WAC 110-300-0105. Si aad waxbadan uga ogaatid sharcigan, booqo <https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-300-0105>.

Mutadawiciinta Marmarka

- Mutadawiciinta marmarka waa inay ku jiraan kormeer joogto ah oo macalin hogaamiye ah, kormeere barnaamij, agaasime xarun, kalkaaliye agaasime, kalkaaliye macalin, ama laysinka haysta guriga qoyska.
- Mutadawiciinta marmarka **kuma jiraan** tirada saamiga.





Jaantuska Shuruudaha Mutadawiciinta

Nooca Mutadawiciinta	Shuruudaha Tababarka WAC 110-300-0106 https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-300-0106	Hubinta Xogta Shakhsiga	Tirada Saamiga	Tusaaleyaal
Hada	<ul style="list-style-type: none"> Aqoonsashada iyo Sheegista Xadgudubka Udiyaargarowga Xaalada Degdega Kahortaga Xanuunka Sayndaromka U Adeegista Caruurta Waajahaysa Guri-la'aanta Hurdo Badqabta: kaliya haddii mutadawacnimadu tahay qolka cunuga Ogolaanshaha Latacaalista Cuntada: kaliya looga baahan yahay kuwa diyaarinaya ama bixinaya cuntada 	Haa	Haa	<ul style="list-style-type: none"> Waalidiin geeya caruurta qolka hurdada marka safarada Qofkaste oo tirsada saamiga oo aan magdhow la siin (tusaale, xubnaha qoyska)
Marmar	<p>Ma jiraan shuruudo ilaa mutadawiciinta ay galaan qolka cunuga yar ama qorshe lagu diyaarinaayo ama lagu siinaayo cunto.</p> <ul style="list-style-type: none"> Hurdo Badqabta: kaliya haddii mutadawacnimadu tahay qolka cunuga Ogolaanshaha Latacaalista Cuntada: kaliya looga baahan yahay kuwa diyaarinaya ama bixinaya cuntada 	Maya	Maya	<ul style="list-style-type: none"> Ardeyga koolejka ee ku jira ama caawinaya deegaanka waxbarashada. Booqashada maktabada ee bilaha Caawimada fasalka

Su'aalaha Badanaa La Is-Weydiyo

Maxaa ardeyda koolej loo tixgaliyaa?

Ardeyda koolehka ama ardeyda kale ee mutadawiciinta (tusaale ahaan ardeyda dugsiya sare) waa mutadawiciin marmar markay la socdaan ama caawinayaan deegaanka waxbarashada. Xaaladani, waa inay helaan isticmaal aan la kormeerin oo caruurta umana baahna hubin xogta shakhsiga ama shuruudaha tababarka (WAC 110-300-0100(10d)). Markay dhacdo in barnaamijku rabo ardey koolej in lagu daro mutadawiciinta hada oo lagu tiriyo saamiga, waa inuu buuxiyo dhamaan shuruudaha sare lagu xusay ee mutadawiciinta hada ka hor intaan lagu tirin saamiga.

Waa maxay isticmaalka aan la kormeerin?

Isticmaalka aan la kormeerin wuxuu dhacaa marka shakhsi lagaga tago kaligii cunug yar oo helaaya waxbarashada hore adeegyada ah oo aanu ku jiriin aragti iyo maqal jooqto ah oo adeeg bixiyaya waxbarashada hore ah, shaqaale ay fasaxday DCYF, ama qaraabo ama masuul cunuga ah. WAC 110-06-0010.

Miyaa mutadawiciintu noqdaan shaqaale ka dib saacado go'an?

Ilaa iyo inta shakhsiga aanu helin magdhow, waa mutadawac.

Su'aalo Dheeriya?

Haddii aad ka qabtid su'aalo dheeriya mutadawiciinta, fadlan la xidhiidh liisan bixiyahaaga deegaanka.

Haddii aad rabto nuqullo dukumeenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan la xidhiidh DCYF Constituent Relations (Xidhiidhaha Qaybaha) (1-800-723-4831 | 360-902-8060, ConstRelations@dcyf.wa.gov).